Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:9-aad Tr:16.11.2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa:9-aad, sacada furitanka.12:32 gh, Sacada xiritanka.1:42 gd.

Guntinta:142 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Warbixin Kooban: Darbiga Xuduudda Soomaaliya iyo Kenya,& Diyaarinta Hindise Sharci Yeedka la xiriira

4.Doodda Hindise Sharciyeedka Iibka, Qandaraasyadda iyo Dheef wadaaga Qaranka.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

1.Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka Uu akhriyay xildhibaan: Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada uu u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha xildhibanada Wey ansixiyan ajendaha.

Xildhibaan:Aadan Ibraahim,wuxuu soo jeediyay, waxaan wakiil ka nahay shacabka waxay

cabasho ka soo jeediyeen hantidii qaranka oo la cabiranayo,oo la boobayo waa dhulkii tarabu nka oo bur-burin ka socoto lana kala iibsanayo waa in wax laga qabta hatidas qaranka oo iibku socota oo lagu soo dadiyay ciidan nabad sugid waa in ay wax ka qabtan guddigi ku shaqada lah

3.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegey,manta waxey ahayd in la keeno Hindise Sharciyeedkii loo xilsaray guddigii isku dhafka ahaa ee xukuumadda iyo barlamaanka eek u saabsana Darbiga xudduda Kenya iyo soomaaliya, waxaan u yeerayaa guddoomiye ku xigeenka guddiga arrimaha gudaha ee baarlamaanka.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow guddoomiye ku xigeenka guddiga arrimaha guddaha,wuxuu soo jeediyay,howshii wan ku guda jirna waxaan rabna in aan helno xaqiiqada dhabta ah oo an wadno saxaafada,waxaan baxeyna bari wan idiin kenayna warbixinta iyado qoran oo dhameystiran hoosna ha loo eego midas ayaa inoo dhiman wan ku soo dareyna.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dhalxa guddoomiye ku xigeenka arrimaha dibada,wuxuu shegay,Masu'liyadii naloo xilsaray guddiga arrimaha gudaha iyo guddiga arrimaha dibada howshi waan ku guda jirna,Guddoomiyaha barlamaanka iyo kuxigeenka 2aad waxay is arkan Rai'sal wasaraha,waxaa leysla gartay markii arrintan fusho ayan warbixinta idiin soo gudbineyna,markii hore waxay ahayd qaraar waxaa la yiri ha laga dhigo sharci,Guddoomiyaha talo ayaan u soo gudbinay oo ah in guddiga arrimaha dibada iyo guddiga arrimaha guddaha iyo guddiga difaca in ay is racan, iyo in nalagu soo daro xaqiiqo raadinta Guddoonka waa naga aqbalay.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waxaan jeclan laha in sidaas loo daayo.

Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu soo jeediyay,arrintaan wax badan ayay soo socotay waxaa masu'l ka ah xukuumada in dib loo dhigo mahan xaqiiqo raadinta maxuma hadana dib ayay u dhigeysa arrintan waa in laba maalmood gudahooda lagu soo afjaraa.

Guddoomiyaha Golaha, wuxuu sheegey,waxaa noo xilsaran 3 guddi, guddiga arrimaha dibada iyo guddiga arrimaha gudaha iyo guddiga difaaca,maahan mid joogsaneyso hadan nahay golaha mid aan yeelayno maahan,waxaad na fartan in Guddoonka uu keeno Hindise Sharciyeed.

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdala Cawad,wuxuu shegay,xubnihii aan u xilsar nay howsha waa ku guda jiraan, waa in la dul istaga oo la soo arka calaamadihii la bur buriyay, shucuubta shacabka oo kacsan waa in lala qeybsada ,wasaaradda gaashan dhiga iyo xooga dalka waa in ay qeyb libax ka qatan,xunbaha loo xil saray waa in ay kenan Hindise Sharciyeedka Golaha sida ugu dhaqsiyaha badan.

Xildhibaan:Guure,wuxuu soo jeediyay, mudo 6 bilood kabadan waxaa la magacabay guddi isku dhaf ah, guddigaas lama siin wax tansiilad ay ku ambabaxaan,waa kala duwan yihiin sharciga iyo booqashada sharciga waa soconaya waxaan rabna in laba maalmood gudahooda in lagu keeno, dadka soomaaliyeed waxan u sheegaya yeeli mayno ilaa iyo hada xukuumada kama hadlin way ka aamustay arrintan darbiga Kenya ay ka dhisayso dhulka soomaaliya.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay,intaas manta halagu joojiyo bari subax ma foga Hindise Sharciyeedka waa uu socda, xoghayaha guddiga maaliyada ku soo dhawaw.

4.Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali, wuxuu soo jeediyay,Hindise sharciyeedkan wuxuu maraya akhrintii 2aad waa sharci muhiin ah wuxuu ilaalinaya boobka hantida qaranka hadana waxaan diyaar u nahay in aan ka warbixino wixii talo ah ama su'aalo ay ka qaban xildhibanada, hindise sharciyeedkan hada uguma horeyso marar badan ayaa barlamaanka la keenay nuqulka waa heysatan horayna waa loo qeybiyay.

Xildhibaan:Cabdulaahi Jaamac Xuseen,wuxuu sheegay,sharcigan iibka waa sharci aad u balaaran weyna ku amaanan yihiin guddiga dowladii hore ma jirin, ujeedada loo sameeyay waa in tartan xalaal ah la sameya sidii loo gaari lahaa waxaa fulinaya 3 arimood hay'ada iibka,guddiga maaliyadda, iyo kan loo geynayo, haday dadaasho sharcigaan waa shaqeynaya guddiga waa mid madax banana ka dib baarlamaanka ayaa la keenaya guddi ahaan ayay no qusaysaa in uu noqdo mid hufan, guddigan waa in uu golaha wasiirada soo mara ka dibna Barlamaanka ansixiya ka dibna Madaxweynaha Digrato ku soo saraa, halkaa waxaa ka dhalaneysa in lala dagaalamo musuq-maasaqa, madaxda ka tirsan guddiga waa in ay cadaysa qofkii qalad gala waa in maxkamad la hor kena, Qod.35 wuxuu ka hadlaya maamulka, Qod.38aad wuxuu ka hadlaya cidii maamulaysa, Qod.44aad wuxuu ka hadlaya in agaasimaha guud uu magacabayo,dowladii dhexe iibka qaranka wuxuu ka bilaaban jiray 100.000 sh.so, guddiga cinwaan ha loo yeelo waxaa iska maamulanaya wasiir kaliya Qod.70aad waa tartan furan, Qod.71aad waa wadani, Qod.72aad waa caalami, guddigan waxaa saxiixaya Madaxwey naha oo digrato ku soo saraya.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,Eray ahaan iibka waa in lagu daraa qandaraasyada.

Xildhibaan:Jaamac Oday,wuxuu soo jeediyay, sharcigaan waa mid international ah waxaan dooneyna in si fiican loo soo akhriyo waa in aad wax ku dartan wixii sax ah su'aalahana aad badisan si loo fahmo.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu soo jeediyay,sharcigan iibka qandarasyada halkan kuma cada inlagu daro ganacsato wax isku darsatay, halkan kuma cada xubnaha inta ay ka kooban yihiin iyo hay'ada soo magacabi la hayad iyo inta ay haynayan xilka ma 2sano, 3sano waa in la kala saaro, guddiga waa in uu ahado mid qaabilsan gudaha iyo dibada, kuma qorna qaab international ah waa in loo fiiriya qaabkii caalamiga, in lakala saaro mahan guddiga

mesha uu ku shaqeynayo,Qodobada shuruucda laga mamaar manka ah tartanka hadii gudaha ay tahay waxey qabanayan midka localka ah,midka internationalka ah waxey qabanayan sharciga internationalka ah waxan cadeynaya in shaqadas ay qaban karto soomaaliya.

Xildhibaan:Cabdulqaadir CC,wuxuu sheegey, sharcigaan wuxuu muhiim u yahay aduunka meelaha ugu musuq-maasuqa badan, marba hadii aad cutub ka baxdo midka kale waa isku qasan yahay, labadii wasaaradood iyo guddiga qaabkii looga wada shaqeyn lahaa ma qeexna, wuxuu u baahan yahay in guddiga dib loogu celiyo ka dibna si wanagsan ay ugu soo shaqeyan ka dibna baarlamaanka lagu soo celiyo.

Xildhibaan:C/risaaq Jurile,wuxuu soo jeediyay, wuxuu ka mid yahay shuruucda ugu muhiimsan ee wadanka lagu dhowrayo iyo naas nuujinta in dadka si xalaal ah ugu qeyb galo tartanka dowliga waxay mudan yihiin amaan iyo bogaadin dadkii soo diyaariyay sharcigaan waan taageeraya mudnaantana waxa iska leh afka soomaaliga in lagu soo qoro sharcigan,waxaan qabaa in dib u habeen lagu sameyo sharcigan waxaan jeclan laha in aan meel iska saarno eedeynta.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,wuxuu sheegey,sharcigan waa sharci weyn ahmiyad lamasiinayo ee dadkii ka doodi la haa mahayno,masu'liyad ayaa nasaran, iibka ayaan ka doodeyna waxaa fadhisa 25 xildhibaan waa wax laga xishoodo.

Guddoomiye ku xigeenka 2aad Mudane: Mahad Cabdalle,wuxuu soo jeediyay,waxaa muuqata in aysan xildhibaanada fursad u heli Karin oo sida la rabay loo soo akhriyin, waxay sheegen xildhibaanadii ka hadlay inaysan ku jirin sidii loo magacabi la haa xubnaha, weyna ku jiran.

Xildhibaan:Maryan Macalin Isaaq,waxey sheegtay, saakay xildhibano jaamacada gahayr dhib ayaa ka dhacay shacab ma saakiin ah ayaa la yiri kaalaya waxaan idiin sii neyna kaarar, markii ay yimaden waxaa la mariyay baas guddigii ku shaqada la haa waa in ay wax ka qabtan.

Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka, wuxuu sheegey**,** waa in la soo akhriya si looga doodo sharcigan kulanka kale ee xiga**.**

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa:9-aad,uu shir Guddoominayay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:42 gd.